WASHINGTON EARLY ACHIEVERS
PREPARING CHILDREN FOR SUCCESS IN SCHOOL

Siyaasadda Dib u Cusboonaysiinta Qiimaynta Early Achievers

Qiimaynaha Early Achievers waxa uu shaqaynayaa muddo saddex sannadood ah oo ka bilaabanta taariikhda fasaxidda qiimaynta ugu dambaysay ee kaqaybgalaha. Siyaasaddan waxay sharaxaysaa habka ay tahay inay raacaan bixiyayaashu si ay u dhammaystiraan dib u cusboonaysiinta qiimaynta.

Maxay: Siyaasadda Dib u Cusboonaysiinta Qiimaynta Early Achievers.

Ayo: Ka qaybgalayaasha Early Achievers ee horray u haystay qiimaynta Early Achievers oo la qiimeeyay ugu yaraan 24-kii bilood ee ugu dambeeyay.

Goorma: Laba iyo toban bilood kahor qiimaynta saddexaad taariikhda sanadguudareeda. Goobuhu waa inay codsadaan cusboonaysiintooda qiimaynta koowaad taariikhda sannadguuradooda ama kahor.

Waayo: Kaqaybgalayaasha Early Achievers waa inay buuxiyaan qiimayn cusub saddex sannadood oo kasta si ay uga qaybgalaan abaalmarinada Early Achievers sida deeqaha waxbarasho, deeqaha iyo abaalmarinta horumarinta tayada oo kale (haddii ay khuseyso). Deeqada waxbarasho ee Early Achievers waxaa heli kara shaqaalaha xarunta ka qayb galaysa Early Achievers. Sidoo kale, xaalada qiimaynta waxaa lagu eegaa marka la eegayo mudnaanta Deeqda Lacagta Early Achievers iyo Barnaamijka Deeqda Waxbarashada Washington. Goobta waxaa lagu eegaa "ka qayb galaha Early Achievers" iyada oo la sugayo dib u cusboonaysiinta.

Sidee: Laba iyo toban bilood kahor sannadguurada qiimaynta, Xiriiriyaha Koowaad ee xarunta ama Lagala Xariiraha Goobta/Maamulaha ayaa heli doona iimeyl xusuusinaya inay u codsadaan goobta qiimayn si ay u cusbooneysiiyaan qiimayntooda iyagoo soo buuxinaya dalabka Codsiga Qiimaynta Goobta ee MERIT. Goobuhu waa inay dalbadaan qiimayntooda kahor inta aan la gaadhin taariikhda sanadguurada qiimayntooda si ay u haystaan xaaladdooda qiimaynta kaqaybgale Early Achievers oo la qiimeeyay ahaan.

Marka dalabka la helo oo uu gobolku qiimeeyo, Xiriirka Koowaad ama Xiriirka/Maamulaha Goobtu waxa uu heli doonaa iimeyl caddayn ah oo codsigana waxaa loo diri doonaa Cultivate Learning ee Jaamacadda Washington. Xiriiriyaha Bulshada ayaa markaa la soo xariiri doona goobta si uu ugala xaajoodo hawlaha aruurinta xogta goobta.

Kadib markii la dhammaystiro aruurinta xogta oo dib u eegid lagu sameeyo saxnaanteeda, bixiyuhu waxa uu heli doonaa dib u cusboonaysiinta qiimayntiisa. Taariikhda dib u cusboonaysiinta qiimaynta la sii daayay ayaa noqon doona taariikhda cusub ee sannadguurada qiimaynta xarunta/goobta. Bixiyayaashu waxay haystaan ilaa 30 casho kadib markii la sii daayo qiimaynta inay racfaan ka qaataan haddii ay u malaynayaan in qiimayntu ahayd mid qaldan.

Bixiyayaashu waa inay ka eegaan Tilmaamaha Hawlgalka Kaqaybgalayaasha Early Achievers tafaasiisha dheeraadka ah ee aruurinta xogta, qiimaynta iyo hannaanka racfaanka.

WASHINGTON EARLY ACHIEVERS
PREPARING CHILDREN FOR SUCCESS IN SCHOOL

Su'aalaha Badanaa La Iswaydiiyo ee Dib u Cusboonaysiinta Qiimaynta Early Achievers

Sidee ku codsadaa dib u cusboonaysiinta qiimaynta?

Waxaad ka geli kartaa oo aad ka buuxin kartaa arjiga Dalabka Qiimaynta Goobta MERIT marka aad gasho laba iyo tobanka bilood ee qiimaynta saddexdaada sano ee taariikhda sanadguurada.

Sidee ayay wax noqonayaan hadii aad helo arjiga Dalabka Qiimaynta Goobta ee MERIT kahor laba iyo tobanka bilood ee saddexdayda sano ee taariikhda sanadguurada?

Waxaad arki doonta doorashada codsiga oo ah Bilaash ama Dib u Qiimaynta Lacagta ah. Fadlan sug si aad u dalbato dib u cusboonaysiinta qiimayntaada ilaa inta aad gaadhayso laba iyo tobanka bilood ee qiimayntaada saddexda sano ee sanadguurada.

Markii aan codsado dib u qiimaynta waxaan kala dooran karaa meelaha aan doonayo in la qiimeeyo ee (ERS, CLASS iyo/ama naqdinta duwaanada). Waa maxay sababta aanan u arki karin doorashooyinkaas markii aan codsado dib u cusboonaysiinta qiimaynta?

Si ka duwan dib u qiimaynta, dhammaan dib u cusboonaysiintu qiimaynaha waxay ka kooban yihiin qiimaynaha ERS iyo CLASS, oo ay ku jiraan xogta shaqaalaha cusub iyo horumarinta xirfadeed. Bixiyayaasha doorta aruurinta macluumaadka buuxa waxay sidoo kale heli doonaan naqdinta duwaanadooda qiimaynta goobtu inta ay socoto.

Anigu waxaan kujiraa barnaamijka ECEAP iyo/ama waxaan ku helaa kabitaanka gobolka carruurta aan ahayn da'da dugsiga. Maxaa dhici doona haddii aanan soo buuxin dib u cusboonaysiinta qiimayntayda?

Bixiyayaasha aan u soo dhammaysan dib u cusboonaysiinta qiimaynta waxa ay halis u geli doonaan inay waayaan qandaraaskooda ECEAP iyo/ama kabka gobolka. Waxaa intaa dheer, in bixiyayaashu ayna u qalmi doonin inay helaan abaalmarinta hagaajinta tayada iyo magdhawga kabka darajaysan.

Maxaa dhacaya haddii ay dib u cusboonaysiinta qiimayntayda aanay soo buuxin heerka looga baahan yahay bixiyayaasha qaata kabka gobolka (Heerka 3) ama barnaamijyada ECEAP (Heerka 4)?

Bixiyayaasha aan soo buuxin heerka qiimaynta looga baahan yahay waa in ay qaadaan hawlaha sixidda ah. Macluumaadka hawlaha sixidda waxaa laga heli karaa Siyaasadda Hawlaha Sixidda ee Early Achievers.

Kaqaybgalayaasha Early Achievers ee bixiya adeegyada ECEAP, adeegyada Head Start, ama aqbala kabka Working Connections Child Care ayaa u qalmi doona hal dib u qiimayn oo bilaash ah. Macluumaadka dib u qiimaynta waxaa laga heli karaa Siyaasadda Dib u Qiimaynta Early Achievers.

Yaan la xiriiri karaa haddii aan qabo su'aalo ku saabsan hawsha dib u cusboonaysiinta qiimaynta?

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan dib u cusboonaysiinta qiimaynta, fadlan la xiriir hay'adda Child Care Aware ee deegaankaaga, Head Start Grantee ama ECEAP Contractor.

Yaan la xiriiri karaa haddii aan u baahdo gargaarka farsamo ee MERIT, ama haddii aan qabo su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan nidaamka dib u cusboonaysiinta qiimaynta?

Fadlan u dir iimeyl su'aashaada gaarka ah QRIS@dcyf.wa.gov.